



## , aniguna waxaan ahay Damaam Binu Saclabah, Bani Sacad Bani Bakar walaalkood ah

Annas Binu Maalik Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Anagoo masaajidka la fadhina Nabiga scw ayaa nin riti fuushan la soo galay masjidka, wuxuu ritigii ku arumay masjidka, ka dibna masjidka ayuu ku xirtay, ka dib dadkii wuxuu ku yiri: kiineeba ah Maxamed? Nabigun scw asxaabta dhexdooda uu xusul mudan yahay, markaasaan ku niri: waa ninkaa cad ee xusul mudan, ninkii wuxuu Nabiga ku yiri: ina Cabdul Mudalibow, Nabigu scw wuxuu ku yiri: waan ku ajiibay. Ninkii Nabiga scw wuxuu ku yiri: waan ku waydiinayaa waana kugu adkaynayaa su'aasha ee ii dul qaado? Nabigu scw wuxuu ku yiri: waxaad rabto I waydii, wuxuu yiri: Rabigaa iyo Rabiga cidii kaa horaysay ayaan kugu dhaariye, ma Ilaahay baa kuu soo diray dadka oo dhan? wuxuu yiri: Allahayow haa, wuxuu yidhi: Ilaahay baan kugu dhaariye ma Ilaahay baa ku faray inaan tukano shan salaadood habeenkii iyo maalintii? wuxuu yiri: Allahayow haa, wuxuu yiri: Ilaahay baan kugu dhaariye ma Ilaahay baa ku faray inaan bil ka soono sanadka? wuxuu yiri: Allahayow haa, wuxuu yiri Ilaahay baan kugu dhaariye ma Ilaahay baa ku faray inaan sakada ka qaadno intayada qaniga ah una qaybino intayada saboolka ah? wuxuu yiri: Allahayow haa, wuxuu yiri: waan rumeeyey waxaad la timid, ana rasuul baan u ahay kuwa iga dambeeya , aniguna waxaan ahay Damaam Binu Saclabah, Bani Sacad Bani Bakar walaalkood ah.

[Xadiis Saxiix ah.] [Waxa wariyay Albukhaari.]

Anas Binu Maalik Allaha ka raali Noqde wuxuu sheegay iyado asxaabtu la fadhiyaan Nabiga scw masaajidka, ayaa nin rati fuushan la soo galay oo ritigii arumay ka dibna xiray. Ka dibna wuu waydiiyey asxaabta: kiineebaa ah Maxamed? Nabiguna scw asxaabta dhexdooda ayuu xusul mudan yahay , wuxun ku niri: waa ninkaa cad ee xusul mudan, ninkii Nabiga wuxuu ku yiri: ina Cabdul Mudalibow, Nabiga scw wuxu ku yiri: waan ku maqlayaaye i waydii waan kuu jawaabine. Ninkii wuxuu ku yiri Nabiga scw waan ku waydiin waana kugu adkayne ha i igu xanaaqin. macnaha: ha ii caroon oo ah i dhibsan. Nabigu wuxuu ku yiri:- i waydii waxaad rabtid. wuxuu yiri: waxaan kugu dhaariyey Rabigaa iyo Rabiga cidii kaa horaysaye, ma Ilaahay baa kuu soo diray dadka? wuxuu ku yiri: Allahayow haa, isagoo adkaynaaya runtiisa. Ninkii ayaa yiri: Ilaahay baan kugu dhaariye, ma Ilaahay baa ku amray inaan tukano salaadaha shanta ah maalinta iyo habeenka? waana salaadaha faralka ah, wuxuu yiri: Allahayow haa, wuxuu yiri: Ilaahay baan kugu dhaariye ma Ilaahay baa ku amray inaan ka soono bishan sanadka? waa bisha Ramadaan, wuxuu yiri: Allahayow haa, wuxuu yiri: Ilaahay baan kugu dhaariye, ma Ilaahay baa ku amray inaad ka qaado sadaqada kuwayaga qaniga ah oo aad u qaybisid kuwayaga saboolka ah? waana sakada, Nabiga wuxuu ku yiri scw Allahayow haa, Damaam wuu Islaamay, wuxuuna u sheegay Nabiga scw inuu ugu yeeri

doono tolkii diinta islaamka, wuuna isa sheegay inuu yahay Damaam Binu Thaclubata, oo reer banii Sacad banii Bakar ah.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65044>

النجاة الخيرية  
ALNAJAT CHARITY

